

Dhammaan qoysaska TDSB,

Dowladda Ontaariyo waxay dhowaan ku dhawaaqday in guddoomada waxbarashada ee iskuuladu ay bixin doonaan fursado si toos ah ee iskuulka loo tegeyo iyo waxbarasho dadban ee Internetka ah ee sanad dugsiyeedka 2021-22.

Iyadoo arrintan maskaxda lagu hayo, Guddoonka Waxbarashada ee Dugsiyada Degmada Toronto (TDSB) waxay qoysaska ka codsan doonaan inay soo buuxiyaan **Foomka Xulashada ee Waxbarashada tooska iskuulka loo tegeyo ama Waxbarashada dadban ee Internetka** bartamaha Ogosto.

Waqtigaas, qoysasku waxay heli doonaan macluumaad sugan oo ku saabsan xaaladda aafada/jirrada iyo tallaallada shaqaalaha iskuulka iyo ardayda, waxayna awood u heli doonaan inay si fiican u helaan macluumaad si ay u gaaraan go'aan sax ah. TDSB sidoo kale waxay ku sugnaan doontaa meel fiican oo ay ku bixiso macluumaadka ku saabsan tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada ee waxbarashada tooska ah ee iskuulada tooska loo tegeyo iyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo noolaado, iyo waxbarashada dadban ee Internetka inay fidiso.

Dugsiyada Waxbarashada Dadban ee Internetka (hoose iyo sare) ee hadda jira lama siin doono fursad sanad dugsiyeedka 2021-22. Waxbarashada dadban ee Internetka waxaa lagu bixin doonaa iskuulada deegaanka waxaana ka mid noqon doona waxbarasho toos ah, onlineka tooska ah oo ay ka qayb qaadanayaan macalimiinta, shaqaalaha iyo ardayda ka socota iskuulka deegaanka ama koox iskuulo ah.

Waxaan rajeyneynaa inaan dib ula xiriirino dhammaan ardayda iskuullada deegaankooda bisha Sebtember 2021, maadaama aan qorsheyneyno in tartiib tartiib looga baxo aafada/jirrada. Bartamaha Ogosto, waxaan fileynaa in la gaaro heerar sare oo tallaah ah ee shaqaalaha TDSB, ardayda iyo qoysaska, waxaanna fileynaa in qoysas badan ay dooran doonaan Waxbarashada Tooska ee Iskuulada loo Tegeyo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Foomka Xulashada ee waxbarashada tooska iskuulka loo tegeyo ama Waxbarashada dadban ee Internetka waxaa si toos ah loogu soo diri doonaa qoysaska bisha Ogosto. Dhammaan macluumaadka iyo foomka xulashada sidoo kale waxaa laga heli doonaa shabakadda websaytka TDSB.

Waad ku mahadsan tihiiin taageeradiina joogtada ah sida aan uga wada shaqeyno si aan u qorsheyno sanad dugsiyeedka soo socda!